KU DHAQAN XAFIIS D.

# Faafin Rasmi ah

EE JUMHURIYADDA DIMUQRADIKA SOMALIYA

**Sanadka 1** Mogadiscio ah 21 Luuliyo 1973 **L. 14**

**Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah ee ka tirsan Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka**

**FAAFIN BIL SOO BAXA**

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Samaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qoritaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinaya Xafiiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

## KOOBNIIN

## BOGGA KOOWAAD

SHARCI L. 6 GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 25 Juunyo 1973 — *Dhisidda Wakaaladda u Qaybsan Waraabinta Afgoye Mordile.* Bog. 227

SHARCI L. 7 GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 7 Luliyo 1973 – *Wax ka Bedelid.* » 231

## BOGGA LABAAD

### XEER DOWLADEED

XEER GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 5 Luliyo 1973, L. 72 — *Dhismaha Wasaaradda Bosaha iyo Isgaarsiinto.* » 233

XEER GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 15 Luliyo 1973, L. 73 — *Dallacaad la siiyey Sareeye Guuto Jaalle Moxamed Cali Samatar.* » 245

XEER GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 15 Luliyo 1973, L. 74 — *Dallacaad la siiyey Sareeye Guuto Jaalle Xussen Kulmie Afrax.* » 246

# BOGGA KOOWAAD

SHARCI L. 6 GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA

25 Juunyo 1973.

Dhisidda Wakfiladda u qaysan warabinta Aegoy-Mordile.

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGA OO TIX GELINAAYA Go'aankii ka soo baxay Golaha Sare ee Kacaanka;

WUXUU GUDDOOMIYEY

Sharciga soo socda:

Qoddobka 1aad

*Dhismaha Wakaaladda Waraabinta Beeraha*

1. Waxaa halkan lagu dhisay Wakaaladda Waraabinta Beeraha Afgoye-Mordile oo loo aqoonsanaan doono Wakaladda.

2. Wakaaladdu waxy ka hoos shaqeyn doonta Xoghayaha Wasaaradda Beeraha iyo Guddida Maamulka Guud.

Qoddobka 2aad

Wakaaladdu waxay noqon doontaa xubin madax banaan dhinaca Sharcingana shakhsiyad leh ujeedadeeduna ay tahay:

1. Islaxidda dhulka, taas oo ah soo saaridda dhinaca Beeraha.
2. Sancaynta midhaha beeraha ka baxa.
3. Sanvaynta wixii kale.
4. Baayac mushtariga xagga beeraha wixii laga soo saaro iyo wixii la geliyo, biyaha waraabiska, makiinadaha beeraha iyo wixii mid ah.
5. In la ijaaro dhulka beeraha, makiinadaha iyo dadka aqoonta

Qoddobka 3aad

*Xafiiska Guud ee Maamulka*

1. Xafiiska Guud ee Maamulka wuxuu noqon doona Magaaladaas Afgoye.

2. Wakaaladdu waxaay xaq u leedahay inay ka furto Xafiisyo meelo kale oo Jamhuuriyadda Gudaheeda ah.

Qoddobka 4aad

*Awoodda Wakaaladda*

Wakaaladdu waxy leedahay awood lagu fulin lahaa shaqadeeda.

QAYETA II.

HABKA DHISMAHA XUBNAHA WAKAALADDA

Qoddobka 5aad

*Guddida Maamulka Guud*

Guddidu waxay ka tirsan tahay:

a) Agaasimaha Guud Wasaaradda Beeraha GUDDOOMIYE.

b) Agaasimaha Laanta miisaaniyadda ee Wasaaradda Lacagta.

c) Agaasimaha Qorsheynta Wasaaradda Qorsheynta iyo Midynta.

Qoddobka 6aad

*Shagada Guddida*

Guddidu waxay kulan yeelaneysaa lixdii biloodba mar, shaqadooduna waxay ka kooban tahay:

1. Inay fiiriyaan shaqadii la qabtay sannadkii hore.
2. Inay oggolaadaan xaashida miisaaniyadda iyo xisaabta sannadka hore iyadoo lagu muujinaayo wixii faa'iido ah ama khasaaro ah.
3. Inay oggolaadaan mashruucyada cusub oo loogu talogalay mustaqbalka.

Qoddobka 7aad

*Guddida Fulinta Maamulka*

Waxaa Wakaaladda loo dhisayaa guddi fulisa Maamulkeeda kana kooban:

1) Miireyaha Guud;
2) Miireyaha Waraabinta;
3) Miireyaha shaqada dibedda;
4) Miireyaha kale oo loo doorto;
5) Xisaabiyaha.

Guddidu fulinta maamulka waxay kulmi bil walba si ay uga xaajoodaan arrimaha Guud ee shaqada iyagoo maamulkaas war gelinaaya Xoghayaha Beeraha.

Qoddobka 8aad

*Magacaabid Guddida fulinta Maamulka*

Miireyaha Guud, Miireyaha Shaqada dibedda kan Warabinta iyo kuwa kale ee loo doorto waxaa lagu magacaabi amar uu soo saaro Guddoonshaha Golaha Sare ee Kacaanka. Xisaabiyahana waxaa dooraaya Xoghayaha Lacagta.

Qoddobka 9aad

*Mushaaharka iyo Gunadda*

Wakaaladdu waxay ka mid tahay kuwa darejada dhexe « B » dadka u shaqeeyaana waxa wax lagu siineyaa habka loogu tala galay Wakaaladaha kale ee derajada « B ».

Qoddobka 10aad

*Shaqada Miireeyaha Guud*

1. Miireeyaha Guud waa madaxda xubinta wax fulisa.
2. Wuxuu ka masuul yahay hirgelinta go'aannada ka soo baxa guddida Maamulka Guud.
3. Isagaa masuuul ka ah hay'dda Wakaaladda.

Qoddobka 11aad

*Shaqaalaha*

1. Wakaaladdu, si ay arrimaheeda u maamusho waxay yeelan karta mid ama laba Agaasime oo lagu magacaabo amar ka soo baxay Guddoonshaha Golaha Sare ee Kacaanka iyadoo la tixgelinaayo talada Xoghayaha Beeraha.
2. Wakaaladdu iyaddaa qoran karta shaqaalaha intiisa kale.
3. Habka iyo shuruudda ay ku shaqeynayaan shaqaaluhu waxa

## QAYBTA III.

## QODDOBADA KU SAABSAN LACAGTA

### Qoddobka 12aad

*Baasamaalka*

Raasamaalka Wakaaladdu wuxuu ka kooban yahay:
(20,000,000) Labaatan Milyan oo shilin oo Dawladdu ku kaalineyso Wakaaladda.

### Qoddobka 13aad

*Miisaaniyadda*

Miisaaniyadda Guud waa inaanay ka dambeyn 30ka Settember Sannad walba, Miireeyaha Guud wuxuu diyaarinayaa xaashidi ka hadleysay Miisaaniyadda Sannadka soo socda oo muujineysa qiyaas wixii soo galay iyo wixii ka baxay Wakaaladda. Miisaaniyadda sannadka waxaa loo gudbinayaa Guddida Maamulka Guud si ay u ogolaadaan.

### Qoddobka 14aad

*Xisaabta Sannadka*

1. Sannadka lacagtu wuxuu bilaabmayaa 1da January wuxuuna dhammaanayaa 31da December sannad walba.

2. Xaashida miisaaniyadda iyo ta xisaabaadka waa in la diyaariyo loona diro Guddida Maamulka Guud ugu dambeystii 31ka Marso Sannad walba.

### Qoddobka 15aad

*Amaahada la ogolyahay*

Wakaaladdu, siday shaqadeeda u socodsiiso, waxaa loo ogolyahay inay ka qaadato amaah Bangiyaasha iyo Laamaha kale ee lacagta ee Jamhuuriadda Dimoqradiga ah ee Somaliya ama kuwa dibedda iyadoo tix gelinaysa ogolaanshaha Guddida Maamulka Guud.

### Qoddobka 16aad

*Xisaabaadka*

Xisaabaadka Wakaaladda waxaa lagu maamulayaa xeerarka iyo sharciyada Dawladda ee u degsan arrintaas.

### Qoddobka 17aad

*Baarista*

Xisaabaadka Wakaaladda waxaa baarayaa laanta ka dhisan Xa-
fiiska Hantidhawrka Guud ee Dawladda ee qaabilsan baaridda Wakaa-

Qoddobka 18aad

*Xeerka Wakaaladda*

WaKaaladdda waxaa xeer u ah kan u degsan Wakaaladaha Dawladda.

Qoddobka 19aad

Sharciga wuxuu dhaqan gelayaa isla maalintaa la saxiixay.

Muqdisho, 25 Juunyo 1973.

*Jaalle Sareeye Gaas Maxamed Siyad Barre*

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KECAANKA

---

**SHARCI L. 7 GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA**

**7 Luliyo 1973.**

**Wax ka Bedelid Sharcigii lagu dhisay shirkadda caimiska Qaranka Soomaalied.**

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKU ARKAY Sharciga lambarkiisu yahay 68 oo soo baxay 30kii Agosto (waa sharcigii lagu dhisay Shirkadda Caymiska Qaranka Soomaaliyeed).

MARKU ARKAY Ogolaashaha Gudiga Sare ee Kacaanka (fiiri wargadda lambarkeedu yahay SCS-1-211-72 oo taariikhdeeduna ay tahay 14-12-1972.

WUXUU HIRGELIYEY

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

*Bedelaad qodobka 6aad iyo kan 14aad oo sharciga lagu dhisay*

*Shirkadda Caymiska Qaranka Soomaaliyeed.*

1. Qodobka 6aad iyo kan 14aad oo sharciga lagu dhisay Shirkadda Caymiska Qaranka Soomaaliyeed waa la baaba'shay marka laga bilaabo maalintii Golaha Sare uu u soo bedelay Wasaaradda Lacagta waxaana lagu bedelay qodobkan: Shirkadda Caymiska Qaranka Soomaaliyeed waa shirkad ka mid ah shirkadaha Lacagta oo ay kor fiirin ku leedahay Wasaaradda lacagta (Ist. Finanziario).

2. Waxaana loo sameyn doonaa shaqaalaha Caymiska Xeer hoose oo gaar ah (regulation).

3. Dhaqaalaha Agaasimaha Guud waxaa lagu cadeyn doonaa (Decreto) xaashi uu Madaxweynuhu soo saaro isagoo dhegey ra'yiga Wasaaradda Lacagta.

Qodobka 2aad

*Baabi'in*

1. Waa la baabaa'shay sharciga kastoo ka soo hor jeeda ama la socon karin Sharcigaan.

Qodobka 3aad

*Hirgelin*

1. Sharcigaani horeybuu ka hirgelayaa waxaana lagu soo dhigayaa Bollettinka rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 7 Luliyo 1973.

*Jaalle Sareeye Gaas Maxamed Siyad Barre*
GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA